



QORAAL KU SOCDA:

KA SOCAD:

**Maamulayaasha,
Kormeerayaasha,
Waalidiinta
Dr. Don Coberly
Superintendent of Schools**

Waxbarashadu waa muhiim oo maalin kasta oo dugsiga laga baaqdo waxay u dhigan tahay fursado waxbarasho oo luntay. Hase ahaatee, danaynta koowaad ee Degmo Dugsiyeedka Boise waa badbaada dhammaan ardayda, oo ay ku jiraan kuwa basaska raaca, lugeeya ama baaskiilada u soo fulla dugsiga. Haddii ardaydu aanay si ammaan ah dugsi u iman karin ama haddii dugsi ugu aanu si badbaado leh u shaqayn karin sababo cimilo ba'an oo daafaha magaalada ka dhaca awgeed, waxa laga yaabaa in dugsiga la xidho.

Dugsiyada uma xidhayno xaalado cimilo jiilaal oo caadi ah awgood. Baraf da'is khafiifa, qabowga subaxdii ama jiidaha qaar baraf jiifo kama dhigayso halis dugsiyada loo xidho. Taxadir habboon oo ay ku jiraan dhar habboon, jidad sifaysan, iyo baabuur wadis quman, ardaydu waxay dugsiyada u iman karaan si badbaado leh.

Degmo Dugsiyeedka Boise waxay ku fadhidaa 450 mayl oo isku-wareega Ada. Waxaan ognahay in xaaladaha cimilada daafaha Degmadu ay kala duwan yihiin, jid ilaa jid mararka qaar. Xaaladuhu aad ayey u ba'naan karaan jiid, iyada meel kale ay ammaan tahay. Haddii waalidku u arko in ay halis ku tahay ilmaha inay tagaan dugsiga ikhtiyaar ay u leeyahay inuu ilmaha guriga ku hayo. Haddii dugsiga la xidho, waxa la xidhi doonaa dhammaan dugsiyada Degmada.

Xaalada cimilo ee ugu halisan ee dugsiyada Boise soo waajaha waa:

BARAF: Heerarka barafka Magaalada Boise sida caadiga ah oo khafiifama dhexdhexaad. Hase ahaatee, markasta waxa jirta ku talogalka baraf badan oo da'a kana dhiga socdaalka baabuurta iyo lugtaba halis. Taariikhiyan, badiyaa barafka da'aa wuxuu ku keenaa hakad socdaalka gaadiidka iyo shilal khafiifa daafaha Magaalada. Baraf di'ista caadiga ah ma keento xidhitaan dugsi.

QABOW: Jawiga qabowga ba'an ayaa ka halisan barafka marka go'aan laga qaadanayo dugsi xidhitaanka. Maalmaha aad u qabow welwelkayagu wuxuu ku aadan yahay ardayda usoo lugaynaysa dugsiga. Cimilada qabow ee aad ba'an waxay kale oo nagu keentaa curyaamin xagga basaska ah, oo keenta daahitaan, dahitaankaas oo halis ku noqon kara soo-raacayaasha heerkulka hooseeya awgeed.

BARFKA-YAALA: Barafka-yaala waa xaaladda cimilo ee ugu halisan jiilaalka. Roobka barafka wata iyo/ama baraf noqoshada biyaha da'ay ay jidadka, dariiqyada iyo marinada ka dhigta meelo ku ba'an lugaynta iyo baabuurta. Cimilada barafku jiifo waxay nagu kaliftaa inaan xidhno, xataa haddii aanay jirin xaalado kale oo halis ahi.

Sidee go'aan qaadshada dugsiga xidhistiisa ama inaan la xidhin lagu gaadh? Wakiilada wakaaladaha gaadiidka, xafiiska cimilada xafiiska jidadka, magaalada iyo wakaalada ammaanka magaalada, iyo maamulayaasha dugsiga, oo ay ku jiraan Isuduwanaha, ayaa eega jidadka oo falanqeeya macluumaadka habeenkaas oo dhan iyo saacadah subaxnimada hore. Waxaan ku wada xidhiidhnaa telefon subaxda hore si go'aan loo gaadho.

Haddii dugsi la xidhayo, waxan la socodsiinaa telefiskanada si ay warka u baahiyaan. Waxa kale oo aanu iimaayl u diraa waalidiinta iyo macluumaadka xidhitaanka oo aanu ku soo qorno <http://www.boiseschools.org/emergency/index.html>